

SMITTSKYDDSBLAD

Patientinformation

Latent tuberkulos n r behandling ej ges

 versatt till somali

Version 2022-04-11

Qaaxada qarsoon, macluumaadka bukaan socodka

Marka aan daawaada ka hortegeysa la bixinayn. Warqad ku saabsan macluumaad khuseeya dhakhaatiirta xakamaysa cudurada faafa

Sidee qaaxada lagu kala qaadaa?

Qofka qaba qaaxada sambabada waxa uu qaadsiin karaa dadka kale marka uu qofku meel guri gudihis uu joogo ee uu qufaco. Qaaxada xubnaha kale ku dhacda iyo qaaxada qarsoon midna lama kala qaado. Ma aha wax caadi ah in carruurta intaanay baaluqin qaaxada laga qaado. Khatarta ugu weyn ee isku daarashada waa marka ay dadku wakhti dheer meel wada jooheen, tusaale ahaan dadka isla deggen ee isku qoyska ah.

Waa maxay qaaxada qarsoon?

Ma aha in dhammaan qof kasta oo qaada qaaxada uu u jirado cudurka. Dadka intooda badan, difaaca jirka ayaa iska caabiya in aanay bakteeriyadu kobcin ama korin. Bakteeriyadu way ku sii jiri kartaa jirka laakiin ma aha mid firfircoon. Xaaladdan waxaa lagu magacaabaa **qaaxada qarsoon**.

Qaaxada qarsooni maaha cudur

Mark aadiga lagaa qaado tijaabada dhiiga kadib (tijaabada IGRA) ama tijaabada maqaarka jirka (tijaabada qaaxada) oo lagu sheego inaad qabto qaaxada qarsoon ma lihid astaamo cudur oo ay sabab u tahay qaaxadu. Uma gudbinkartid adigu bakteeriyada dadka kale.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa jirta khatar ah inaad qaado qaaxada wakhti dambe oo noloshaada ka mid ah, laakiin khatartaasi waa mid yar. Sidaa daraadeed xaaladaha intooda badan, looma baahna in wax daawo ah la siiyo dadka qabo qarsoon qarsoon.

Daawada ka hortagga ah ayaa dadka la siiyaa xaaladaha qaarkood

Dadka qaarkood ee khatar ugu jira inay wakhti dambe u jiradaa cudurka ayaa la siiyaa daawo ka hortag ah. Waxay inta badan khusaysaa xilliga uurka iyo dhalimada ka dib, carruurta iyo dhalinyarada, iyo sidoo kale dadka uu nidaamka difaaca jirkoodu daciif yahay, tusaale ahaan dadka kansarka laga daaweeyo, sonkorowga insulinta qaata, cudurka kelyo xanuunka khatarta ah. Daawada ka hortagga ayaa mararka qaarkood sidoo kale la siiyaa dadka dhibaataada ugu jiray inay ku dhacikarto qaaxadu.

La xiriir dhakhtar

Waxaad qabtaa qaaxada qarsoon laakiin takhtarkaagu wuxuu qiimeeyey inaad hadda u baahnayn daaweyn. Haddii aad mustaqbalka dambe yeelato qufac dheer (in ka badan saddex toddobaad), dhidid habeenkii, qandho ama miisaan oo kaa dhaca adigoo doonayn, la xiriir dhakhtarkaaga si lagaaga baadho qaaxo. Waa inaad sidoo kale la xiriirtaa dhakhtarka haddii aad uur yeelato, ama aad qaadato daawada sonkorta ee insuliinta, cudur kelyo xanuun khatar ah. Daawaynta kansarka ama nidaamka difaaca oo sabab kale u daciifay. Xaaladahan oo kale waxaa jirta khatar dheeraad ah oo keenikarta inaad u jirado qaaxada.

Warbixinta xiriirka (*Kontaktuppgifter*)

Magaca qaybta qaabilaadda (*Namn p  mottagningen*)

.....

Lambarka telefoonka/wakhtiga telefoonka ee qaybta qaabilaadda (*Telefonnummer/telefonid till mottagningen*)

.....